

When Should I Call My Baby's Doctor?

Call 911 if your baby turns blue or has trouble breathing.

Call your baby's doctor if your baby has any of the following:

- Cries non-stop or is more irritable
- A temperature above 100 degrees Fahrenheit checked under the arm
- Frequent discharge from the eyes
- A hard time breathing
- Yellowing or rash on the skin that gets worse
- Redness, discharge or a foul smell from the healing umbilical cord
- Breastfeeding less often or taking less formula for more than 8 hours
- Green vomit or vomiting after more than 2 feedings in a row
- Hard to wake up
- No wet diaper for more than 8 hours
- Change in stool patterns, constipation or diarrhea
- Cough that will not go away, especially if there is a rash

If you have any concerns about your baby's health, call your baby's doctor, family doctor or health clinic. Never be shy about calling the doctor's office. Often talking to your baby's doctor or nurse will help you decide if your baby needs medical care. When you call the doctor, have written down:

Goorma Ayay Tahay Inaan Waco Dhakhtarka Ilmahayga?

Wac 911 haddii ilmahaagu midab-doorsoomo ama sii madoobaado ama neefsashadu dhibayso.

Wac dhakhtarka ilmahaaga haddii ilmahaagu ama nuunuugaagu leeyahay mid ka mid ah kuwan soo socda:

- Si aan kala-joogsi lahayn ayuu u ooyayaa ama intii hore ayuu ka oohin dhow yahay ama ka camal xun yahay
- Waxa uu qabaa heerkul ka badan 37.8 °C (100 darajo oo ah Fahrenhayt) oo laga qaaday kilkisha
- Dheecaan fara badan ayaa ka imanaya indhaha
- Neefsashada ayaa dhib ku ah
- Midab ah jaale/hurdi ama finan ku yaala maqaarka ayaa ka sii daray
- Casaan, dheecaan ama ur qadmuun oo ka imanaya xudunta sii bogsanaysa
- Naaska oo uu nuugo in intii hore ka yar ama caanaha dhalada oo uu qaato in intii hore ka yar mudo ka badan 8 saacadood
- Matag cagaar ah ama haddii uu matago ka dib wax siinta taasoo dhacda in ka badan 2 jeer oo ah wax siin oo isku xiga
- Hurdada oo aan laga toosin karin
- Ma jirto kaadi ama xufaayad/dheebar qoyan mudo ka badan 8 saacadood
- Isbeddel ah saansaanta saxarada, caloosha oo adag ama shuban
- Qufac aan tagaynin, gaar ahaan haddii ay jiraan finan

Haddii aad qabtid wax walwal ah oo ku saabsan caafimaadka ilmahaaga, wac dhakhtarka ilmahaaga, dhakhtarka qoyskaaga ama xarun caafimaad. Marna ha ka xishoon inaad wacdid xafiiska dhakhtarka. Badanaa dhakhtarka ilmahaaga ama kalkaalisada oo aad la hadashid ayaa kaa gargaari doona inaad go'aan ka gaadhid in ilmahaagu u baahan yahay daryeel dhakhtar iyo in kale. Marka aad wacdid dhakhtarka, ha kuu sii qornaato:

When Should I Call My Baby's Doctor. Somali.

- What is wrong with your baby
- Baby's temperature
- The name and phone number of your pharmacy

Keep a paper and pen nearby to write down the doctor's instructions.

- Sida loo hayo ilmahaaga
- Heerkulka ilmaha
- Magaca iyo teleefonka farmasigaaga

Sii diyaarso warqad iyo qalin aad ku qortid fariimaha dhakhtarkaaga.

2/2007. Developed through a partnership of Mount Carmel Health, Ohio State University Medical Center, and OhioHealth, Columbus, Ohio. Available for use as a public service without copyright restrictions at www.healthinfotranslations.com

When Should I Call My Baby's Doctor. Somali.